HBARAACA DOORASHADA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Habraaca Magacaabista Mushaxiinta Aqalka Sare:-

Sida ku cad Habraaca Hirgelinta Heshiiska Siyaasadeed ee Hagaya Doorashada 2020/2021 ee heer Federal, gaar ahaan Guddiga Maamulka Doorashada Dadban ee 2020/21 ee Heer Dowladaha Xubanaha ka ah Dowladda Federalka, qodobkiisa 7aad ee hoosta ka xariiqaya Habraaca Magacaabista Musharaxiinta Aqalka Sare: Guddigu waxa uu la wadaagayaa codsi qoraal ah Madaxweynayaasha DX-DF in ay soo sharaxaan musharaxiinta Aqalka Sare ugu yaraan labo musharax kursi kasta, si waafaqsan shuruudaha xubinnimada Aqalka Sare.

Guddigu wuxuu qabanayaa waraaqaha magacaabista musharaxiinta Aqalka Sare, iyagoo ka hubinaya shuruudaha musharaxnimada, isla markaana xaqiijinaya metelaadda qoondada haweenka ee 30%.

Shuruudaha Musharixiinta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waa:-

- In uu yahay muwaadin Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya
- Dhimirkiisu dhan yahay
- Da'diisu ka yarayn 25 sano
- Aan xuquuuqdiisa muwaadinnimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shanti (5) sano ee ugu danbeysay.
- Uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta.
- In uusan ka tirsanayn ama wax xiiriir ah la lahayn kooxaha argagixisada.
- In uu haysto waraaqdda danbi la'aanta ee hay'adda danbi baarista (CID) maamul goboleed ama mid federaal.

Musharax kasta oo u tartamaya Galaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu bixiyaa lacagta diiwan-gelinta, kuna shubaa xisaabta bangiga ee Guddiga Doorashooyinka.

a) Lacagta diiwan-galinta Musharaxiinta u tartamaya Aqalka Sare waxay noqonaysaa $20,000 (Labaatan Kun oo dollar) musharaxiinta raga iyo $10,000 (toban Kun oo dollar) musharaxiinta haweenka.

b) Lacagta diiwaan-gelinta Musharaxiinta dib looma celinayo.

Qabashada Tartanka Kuraasta Aqalka Sare.

- Ka dib marka ay Madaxweynayaasha Dowladaha Xubanaha ka ah Dowladda Federalka usoo gudbiyaan Guddiga Maamulka Doorashada ee 2020/21 ee Heer Dowladaha Xubanaha ka ah Dowladda Federalka liiska musharaxiinta Aqalka Sare, lana hubiyo in ay u dhammeystiran yihiin dhammaan shuruudaha musharaxnimo, hubiyaanna qoondada haweenka 30%, GMDHDX waxay u gudbinayaan Guddoonka Baarlamaannada Dowaladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federalka, si ay u qabtaan hannanka codeynta musharaxiinta Aqalka Sare ee Baarlmaaanka Federalka Soomaaliya, waxayna fududeynayaan hadal jeedinta musharixiinta Aqal Sare, iyadoo tartame kasta la siinayo 10 daqiiqo oo uu kaga hadlo taariikhdiisa iyo wax qabadkiisa kahor codeynta. Iyadoo ay goob-joog ka yihiin wakiillada guddiyada labada heer ee doorashada.

Natiijada ka soo baxda doorashada waxaa loo soo gudbinayaa Guddiga Hirgelinta Doorashada Heer Federal, si ay usiiyaan shahaadaha xillibaannimadama. Ka dibna wuxuu qaban-qaabinayaa dhaarta Xubnaha Baarlamaanka Aqal Sare.

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب المحاسب العام للحكومة

The Federal Republic of Somalia
Office of the Accountant General

REF: XXG/155/2021 *Date: 18/07/2021*

Ku: Xoghayaha Joggtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha **Muqdisho**

Og: Hantidhawrka Guud ee Qaranka **Muqdisho**

Og: Wasaaradda Maaliyadda **Muqdisho**

Ujeeddo: Xisaabaadka Guddiga Doorashooyinka

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa xisaabaadka Guddiga Doorashooyinka ee kaga furan Bangiyada gaar ka ah: **(Private Banks)** sida shaxda hoos ku xusan:

No.	Magaca Bangiga	Magaca Xisaabta	Xisaab Numbarka
1	Salaam Bank	Howlaha Doorashooyinka	34053499
2	Dahabshiil Bank	Howlaha Doorashooyinka	104113673

Sidaas daraadeed waxaa idinka rajaynaynaa inaad sidaas u la socotaan

Wada Shaqeyn wacan

Fatuma Osman Farah

Xisaabiyaha Guud Ee Dawladda.

WARQADA ANSHAXA MUSHARRIXIINTA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERALKA SOOMAALIYA

Waajibaadka iyo ballanqaadyada laga rabo murashax kasta inta lagu guda jiro Geedi-socodka Doorashada 2020/2021

lnta lagu guda jiro geedi-socodka doorashada, murashax kasta oo u tartamaya kursiga Baarlamaanka Aqalka Sare waa inuu ilaaliyaa, dhowraana dhammaaan heshiisyada, habraacyada, xeerarka iyo shuruucda doorashada 2020/2021, si loo helo jawi fududaynaya in ay u qabsoomaan doorashooyinka 2020/2021 si xor ah oo xalaal ah oo caddaalad ku salaysan.

Xeerkan wuxuu saldhig u yahay geedi-socodka doorashada, wuxuuna hagayaa hawlaha murashaxiinta inta lagu guda jiro geedi-socodka oo dhan, min billow ilaa dhammaad, oo ay ka midyihiin codaynta, tirinta codadka, go'aan ka gaarista cabashooyinka iyo ku dhawaaqidda natiijada doorashada.

Dhammaan murashaxiintu waa inay u hogaansamaan qodobada hoos ku xusan iyagoo adeegsanaya niyad-wanaag.

Qodobada

1. Waxaan u hogaansamayaa Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya iyo dhammaan heshiisyada, xeerarka, habraacyada loo dejiyay qabashada geedi-socodka doorashada 2020/2021, waxaana si buuxda ugu hogaansamayaa una fulinayaa dhammaan habraacydaas iyo xeerarkaas.

2. Waxaan qof kasta ula dhaqmayaa si ixtiraam iyo qadarin ku dheehantahay oo aan lahayn kala faquuq, anoon u eegeynin jinsiga, da'da, naafanimada, asalka bulsho ama xaaladda shakhsi.

3. Waxaan ka fogaanayaa inaan culays saaro xubnaha Baarlamaanka Dowlad Goboleedka ee codeynaya, wakiillada guddiyada doorashada, hawl-wadeenada, murashaxiinta kale, warbaahinta iyo goob-joogayaasha kale.

4. Waxaan ilaalinayaa xeerarka iyo shuruucda ay soo saaraan hay'adaha hirgelinaya doorshada, oo uu ka mid yahay Guddiga Xallinta Khilaafaadka.

5. Waxaan ka fogaanayaa inaan qayb ka noqdo dhaqan kasta oo keeni kara cabsi-gelin, cadaadis ama musuqmaasuq inta lagu guda jiro geedi-socodka doorasho ee 2020/2021, waxaana gacan ka geysan doonaa sidii looga hortagi lahaa ama loo joojin lahaa dhaqamada noocaas ah.

6. Waxaan ka fogaanayaa in aan ku lug yeesho laaluush ama iibsasho cod.

7. Waxaan ixtiraamayaa in dhammaan kormeerayaasha la aqoonsanyahay, warbaahinta/xubnaha saxaafadda iyo weliba wakiilada murashaxiinta ay si xor ah ku gaaraan lana socdaan/kormeeraan geedi- socodka, sida ku cad shuruucda, tilmaamaha iyo habraacyada.

8. Waxaan ixtiraamayaa qarsoodinimada cod-bixinta iyo dhex-dhexaadnimada hanaanka cod-bixinta iyo cod- tirinta. Waana fahamsanahay in wakiiladayda ay xaq u leeyihiin la socodka nidaamka, si waafaqsan habraacyada doorashada 2020/2021.

Waan aqriyay, waana fahamay, waana u hogaansamayaa qodobada kor ku xusan,waxaanna raali ka ahay haddii aan jibiyo mid ka mid ah qodobadaas in la iga hakiyo tartanka musharaxnimo.

Magaca Murashaxa:_____

Taariikhda: _____

Goobta: _____

Saxiixa: _____

Magaca: Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Heer Federaal (GHDHF)

Taariikhda: 18ka July 2021.

Guddiga Hirgeli eer Federaal
FEIT2020-2021